



Baaritaanka nabadgelyada magangalyo-doonka, ay ku jirto kuwa u soo dhammaadey racfaanada

Sanadka la soo dhaafey, Dutch Safety Board (Guddiga Ammaanka Dutch'ka) wuxuu wareystey magangalyo-doonka dalka Netherlands, wuxuuna weydiiyey khibradahooda dalka Netherlands. Guddiga Ammaanka wuxuu rabaa inuu ogaadoo haddii magangalyo-doonkaan intii ay joogeen dalka Netherlands ku dareemeen ama ku jireen xaalado ammaan-darro ah. Wareysiyadaan waxay qayb ka ahaayeen baaritaan baaxad leh uu qabtay Guddiga Ammaanka. Sharraxaad gaaban ee ku saabsan baaritaanka ayaa hoos lagu baxshey, iyo sidoo kaleba wararka kooban ee khuseeya natiijoyinka. Waxaa xittaa la soo baxshey macluumaad khuseeya Guddiga Ammaanka laftigiisa.

Maxuu Guddiga Ammaanka baarey, iyo waa maxay sababta?

Guddiga Ammaanka wuxuu baarey nabadgelyada magangalyo-doonka jooga dalka Netherlands, ay ku jirto kuwa u soo dhammaadey racfaanada. Muhiimadda baaritaanka wuxuu ahaa ammaanka ay dadka ku leeyihiin hoyga dawladda, sida xarumaha deegaanka magangalyo-doonka ama xarumaha qaxootida lagu xiro. Guddiga Ammaanka wuxuu rabey inuu ogaadoo haddii dawladda Dutch'ka sameeyey wixii loo baahan yahay sidii uu u hubiyo in dadkaan ammaan yihiin. Baaritaanka waxaa dhaliyey is-dilka magangalyo-doonka Ruushka ee ka dhacey xarunta qaxootida ee Rotterdam bilowga 2013. Intii uu baaritaanka ka socdey, Guddiga Ammaanka wuxuu wareystey labada magangalyo-doonka iyo shaqaalaha ururyada ka qayb-qaatey hab-socodka magangalyada, sida shaqaalaha Hay'ada Dhexe ee soo Dhaweynta Magangalyo-doonka (COA) iyo Adeegga Hijrada iyo Jinsiyadda (IND), iyo sidoo kaleba qareenada, turjubaanada iyo takhatiirta.

Maxey ahaayeen natiijoyinka ugu muhiimsan ee baaritaanka?

Baaritaanka wuxuu muujiyey in dadka magangalyo ka codsado dalka Netherlands ay caadi ahaan ammaan ku qabaan xarumaha ay ku jiraan. Hase-yeeshe, magangalyo-doonka waxaa marmar ku dhaco xaalado keeno dhibaato maskaxeed ama jireed. Kani wuxuu dhici karaa haddii hab-socodka magangalyada uusan sii fiican u socon, haddii qofka ka qayb-galey uusan helin daryeel caafimaad habboon, ama haddii rabsho ama dagaal ka dhacey xarumaha lagu xirey saamayn ku yeeshay.

Guddiga Ammaanka wuxuu aaminsan yahay in dawladda Dutch'ka laga rabo inuu hubiyo in magangalyo-doonka si ammaan ah ku joogaan dalka Netherlands. Sababtaan awgeeda, Guddiga Ammaanka wuxuu eegey wixii ay samayn karaan shaqaalaha joogo ururyada kala duwan ee u adeego magangalyo-doonka sidii ay u hubiyaan nabadgelyada magangalyo-doonka. Sidoo kaleba, Guddiga Ammaanka wuxuu xittaa eegey waxyaabaha ay ururyadaan wanaajin karaan. Tusaale ahaan, Guddiga Ammaanka wuxuu aaminsan yahay in dawladda laga rabo inuu hubiyo in:

- wada-shaqaynta ururyada la shaqeeyo magangalyo-doonka la wanaajiyo;
- dhibaatooyinka marmar dhaco markii la gudbinaayo macluumaadka caafimaadka magangalyo-doonka sida ugu dhakhsi badan loo xalliyo;
- dhammaan qareenada iyo turjubaanada shaqadooda sii fiican u qabtaan;

- magangalyo-doonka qabo dhibaatooyin xagga maskaxda la siiyo xannaano caafimaad ka fiican; iyo
- ururyada la shaqeeyo magangalyo-doonka si ka wax-tar badan wax uga bartaan dhacdooyinka ama shilalka.

Sidee la yeelaa baaritaanka uu sameeyey Guddiga Ammaanka?

Guddiga Ammaanka wuxuu isku aruuriyey natiijoyinka baaritaanka iyo wuxuu dowladda Dutch'ka u sheegey waxyaabaha loo baahan yahay in la wanaajiyo. 24 Abriil 2014, Guddiga Ammaanka wuxuu warbixinta siiyey Xoghayaha Nabadsugidda Dawladda iyo baarlamaanka Dutch'ka. Dhammantooda waxay akhrin doonaan warbixinta. Haddii ay raacsan yihiin taloyinka uu Guddiga Ammaanka soo qorey iyo khuseeya habka lagu wanaajiyo arrintaan, waxay samayn doonaan tallaabooyinka loo baahan yahay si loo dhaqan-geliyo.

Waa maxay Guddiga Ammaanka Dutch'ka?

Dawladda Dutch'ka wuxuu aaminsan yahay inuu muhiim yahay in dadka joogo Netherlands ay ku safraan, shaqeeyaan iyo ku joogaan si ammaan ah. Markii dhacdooyin ama shilal dhacaan, waa la baaraa si loo go'aamiyo sababtooda. Haddii ay jiraan sababo cad, tallaabooyin ayaa la qaadi karaa si loo hubiyo in dhacdooyinkaas ama shilalkaas dib u dhicin. Dalka Netherlands wuxuu qabaa urur gaar ah ee loo aasaasey si uu u baaro dhacdooyinka iyo shilalka. Ururkaan waa Guddiga Ammaanka Dutch'ka.

Tusaaloyinka shilalka iyo dhacdooyinka uu Guddiga Ammaanka Dutch'ka baaro waxaa ka mid ah diyaaradaha dhacey, dabka ka dhaco warshadaha kimikada, ama markii isbitaalka laga heli waayo daryeel habboon. Guddiga Ammaanka wuxuu si madaxbannaan u go'aamiyaa dhacdooyinka iyo shilalka uu rabo inuu baaro si uu wanaajiyo ammaanka ka jiro dalka Netherlands. Haddii uu lagama marmaan yahay, Guddigiisa wuxuu hay'adaha ama shirkadaha uu baarey siin kara taloyin si ay tallaabo u qaadaan iyo dalka Netherlands ka dhisaan deegaan ka badbaado badan.

Warbixinta Guddiga Ammaanka oo ku qoran af Dutch ka eeg www.onderzoeksraad.nl.
Warar kooban ee ku qoran af Ingiriis ka eeg www.safetyboard.nl.